# Golaha Wakiiladda JSL

## Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda

## Kal-fadhgii 28aad Fadhigii 17aad

**Axad 06/09/2015**

**Fadhigu Wuxuu furmey 10:20 Am**

**Gudoomiyaha: -** C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro)

**Quraan: - Xildibaan Xaamud Cismaan**

**Ajendaha Fadhiga: -** Dooda Xeer-Hoosaadka

**Gudoomiyaha:-** ilaahey ha inagu anfaco aayadaha quraanka kariimka ah, waxaynu u bilaabaneynaa dooda xeer-hoosaadka Goha, Xildhibaanadu ha fadhiistaan, Waxaan ku soo dhoweynayaa Xildhibaanada dooda.

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caalin:-** shirgudoonka iyo xildhibaanadaba waan salaamayaa, doodbanan galimaayo waayo xeerkii shalay la qaybiyayna waan akhriyay kii ay gudidu ka soo shaqaysay ee barigii is jiidhsiiska ahaana waan akhriyayay, anigu waxaan odhan lahaa xeerkaa gudidu ka soo shaqaysay inkastoo aad moodo in ay hawl badan ka galeen, hadana waa xeer isku dhexdaadsan oo aan jaho loo raaco aan lahay waayo xeerkaasi waxaa uu awooda saaraya awooda Gulahadoomiyaha Golaha wakiilada oo aad u buuxdhaaf ah iyo xog-hayaga Golaha Wakiiladda oo isna awood dheeraadka ku leh.
Waxaa kale oo uu xeerkaasi awood dheeraad ah siinayaa sadex (3 guddi) oo kala ah Gudidda Ariamaha Gudaha, Gudidda daba galka Hantida qaranka iyo Gudidda Joogtada ah. Sadexdaa gudi ayuu awooda siinayaa iyo gudoomiyaha iyo xog-hayaha Golaha Wakiiladda, waxaad moodaa in uu xeerkaasi dhinac ka raranyahay, waa yo qodobo Dastuuriya oo badan ayaa ka maqan, waxaa kale oo ka maqan qodobo heshiiskii Guurtida ah ayaa ka maqan oo shir gudoonkii ayaa (completely) meesha laga saaray oo ahayd (collective responsibility).

Waxaa kale oo la sameeyay gudi layidhaa (Business committee) oo iyaduna dhinac ka raran oo gaabigeeduba meel kaliyaata ah. Markaa anigu waxaan odhan lahaa maadaama uu xeerkii noqday xeerka noocaas ah soo jeedin taydu waxaa weeyi:-

**Soojeedin:-**

1. Xeerka dhabta ah ee aan haysanaa waa xeerkii aynu samaynay **2005 – tii** oo lagu daray qodobadii Guurtidu ay soo jeediyeen iyo labada gudi ee la sameeyay oo lagu daray.

2. **Qodobka 10aad** ee ay guurtidu soo jeedisay ee lifaaqa ah ee lagu daray xeerka farqada 10aad ama qodobka 10aad sida uu yahay looma galin karo xeerka ee waa in laga dhigaa lifaaq waad mahadsantihiin.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** shirgudoonka iyo xildhibaanadaba waan salaamayaa, Gudoomiye waxaan jeclahay inaan taageero xildhibaankii iga horeeyay Cabdiraxmaan in xeerkii hore lagu kordhiyo heshiiskii guurtidda ay soo jeedisay lana is waafajiyo. Waxaan jeclahay in lagu kordhiyo wax yaabo kale oo gudi cusub la sameeyo oo Gudidda joogtada ah xilkeeda la kala qaybiyo oo Gudidda cusub laga dhigo gudi anshax gudidaas oo soo samaysa xeer xukuuma mudanayaasha.

Waayo wadan kasta oo dimuquraadiya mudanaha marka la soo doorto ee uu Baarlamaanka yimaado wuxuu sameeyaa declaration uu ku cadaynayo hanti markaa waxaa uu leeyahay iyo in bilwalba la Amend gareeyo oo la eego lana yidhaa maxaa kuu kordhay, hadii aanay wax u soo kordhin uu form buuxiyo yidhaana intaa ayaa ii soo koraydhay ama waxba iima soo kordhin, si loo ogaado in mudanuhu waxaa uu haystaa in sifo sharciya ay ku yimaadeen iyo in kale.

Waxaa intaa raacda inaka nidaamkeenu waa kii maraykanka oo kale waayo ninka wasiirka ahi waxaa uu ku jiraa Baarlamaanka halka ingiriiska aanu ku jirin Baarlamaanka, wasiirkana waxaa xukumaya kaa parliamentarian ka ah, waxaan leeyahay wisaraddana ha loo sameeyo sharci caynkaa odhanaya.

Waxaa kale oo jirta in tilmaamo laha bixiyay ninka xidhibaanka ah labiskiisa kaas oo waafaqsan nidaamka islaamiga ah ama xushmad leh, lakiin waxaan soo xidhaa khamiis, waxaanan doonayaa ma mamnuuc ayuu inaga yahay mise waa lagu iman karaa waad mahadsantihiin.

**Md. Bashiir Sh. Xuseen Tukaale** shirgudoonka iyo xildhibaanadaba waan salaamayaa, anigu hal qodob oo mihiima ayaan ka hadlayaa si aanaymar danbe inoogu dhicin arinkaasi oo ah in xubno shirgudoonka ka mid ahi ay ka kacaan Golaha oo la shaqaynayo waxaan doonayaa in lagu daro xeer-hoosaadka oo aanay arinkaasi mardanbe inagu dhicin ayaan soo jeedin lahaa oo xeer-hoosaadka ay ka muuqato arintaasi waad mahadsantihiin.

**Md. Xuseen Maxamed Cige** shirgudoonka sharafta leh iyo xildhibaanada Golaha Wakiiladda waan salaamayaa, anigu waxay ila tahay in xeerkan hore ee ina horyaalaa aanu dhibaato badan lahayn oo amendment lagu sameeyo mooyaane waayo waa xeer aad looga soo shaqeeyay. Waxaan ka hadlayaa amendment-kaa oo ah xaga saacadaha xildhibaanada, horta waa in aan aqoonsanaanaa ina aan dalka u shaqayno, waanan wada shaqaynaa run ahaantii laakiin waxaan wax ka baddali lahaa saacadaha ku qoran halkan oo

aan ka dhigi lahaa 8:00Am – 12:00pm oo ah 4saacadood 4ta saacadood ee kale waxaan u goynaa ka shaqaynta xeerarka umalayn maayo in ay badantahay afartaa saacadood.

Inta kale waan waafaqsanahay in talaabo adag laga qaado xidhibaanada waayo xadhig xidha waan in la helaa, waayo xildhibaanada qaarna soo shaqo tagi maayaan qaarna suuqa iska joogi maayaan. Xeerkana aad iyo aad ayaa looga soo shaqeeyay oo wixii qodxo ku jiray waa laga saaray, waxayaabo badan oo wanaagsana waa lagu sheegay.

Hadii arimahaa la helo xildhibaano iyo shirgudoon fuliya oo aan lala kala baydh badhin oo 8deedaa saacadood la shaqeeyo aad iyo aad yay u wanaagsan tahay xildhibaankaa ka baydhana waa in shirgudoonku talaabo ka qaado waad mahadsantihiin.

**Md. Ibraahim Caraale Cabdi:-** Bacda salaam, Mudanayaal xeer-hoosaadkii goluhu ansixiyey 19/02/2014 wuxuu ahaa xeer hoosaad deg-deg, caadifad iyo wax kala jiidasho lagu ansixiyey. Waa xeer hoosaad aan goluhu ku dhaqmi karaynin lehna khilaafaad badan oo Dastuurka Qaranka JSL ka hor imanaya, sideedabana Dastuurka Qaranka ayaa ugu sareeya xeerarka dalka, xeer aan isaga waafaqsanaynina wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan sida uu sheegayo Dastuurka Qaranku Qodobkiisa 128aad farqadiisa 2aad.

Iyada oo ay ku jiraan khalado badan qaar dastuuri iyo qaar sidoodabana khalada, hadana waxaan tilmaamayaa qodobo ka hor imanaya Dastuurka Qodobka 79aad ee Dastuurka qaranku wuxuu tilmaamayaa eedaynta xubnaha golayaasha, farqadiisa labaad waxay odhanaysaa "dacwadaha dembiga ah ee lagu eedaynayo xubnaha golayaasha waxaa soo oogaya xeer ilaaliyaha guud, kabacdi marka golaha xubintu ama xubnuhu ka tirsanaayeen ay maamuuska kaga xayuubiyaan saddex meelood laba ahaan tirade guud ee Golaha.

Xeer-hoosaadkan aan ka hadlayo ee la ansixiyey 19/02/2014 maamuuska iyo xasaanada mudanayaasha farqadiisa 5aad waxay qoraysaa "Markii xildhibaan laga qaadaayo xasaanadda waa in ay ogolaadaan kalabadh iyo hal tirada guud ee xubnaha Golaha iyadoo laga reebaayo kuraasta banaanaanshahooda la baahiyey.

Qodobkaasi wuxuu si toosa u khilaafayaa 79aad oo 2/3 sheegaya kana wuxuu sheegayaa absolute majority, waana qodob si toosa uga hor imanaya Dastuurka Qaranka, waa qodob ay ka muuqato in aad moodo in la prepare garaynayo in xubnaha golaha si fudud looga saaro golaha si sharci daro ah. Qodobka 52aad ee Dastuurka oo ka hadlaya shaqaalaha golaha wakiilada farqadiisa 1aad iyo farqadiisa 3aad iyadana xeer hoosaadkan wuu khilaafayaa farqadiisa 1aad waxay odhanaysaa " *Golaha Wakiiladu wuxuu yeelanayaa*

*xoghayn uu madax ka yahay xoghaye guud oo aan ka tirsanayn Golaha Wakiilada; kana kaalmaynaya Shir gudoonka Golaha hawlaha xafiiska, dhamaan arimaha maaliyada iyo maamulka wuxuuna yeelanayaa ku xigeen*" farqada 3aad waxay odhanaysaa "*shaqaalaha kale xoghaynta ah waxaa shaqo galinaya xoghayaha guud marka uu ka helo ogolaansho shirgudoonka",* hadii aad la eegto qodobkaa xeerhoosaadkii hore iyo xeer hoosaadkan dambe, xeer hoosaadkii hore qodobka 17aad wuxuu si wanaagsan u sugayaa awooda shirgudoonka ah ee xeerkan isagi ahi sheegay, qodobadaa iyaga ah ee labada ah ee ay sheegeen.

Xeer-hoosaadkan cusub ee imika aan ka hadlayno ee aynu leenahay wuxuu khilaafsanyahay Dastuurka isaguna wuxuu toos uga hor imanayaa Qodobkaa dastuuriga ah. Page 13 ee xeer hoosaadka cusub qodobka 7aad farqadiisa 2aad iyo qodobka 8aad farqadiisa 14aad, labaduba waxay u muuqdaan inay khilaafsan yihiin wuxuu yidhi waxaa soo magacaabaya xoghayaha iyo ku xigeenka Gudoomiyaha, iyadoo wax talo ah iyo wax ogolaanshiyo ah aan haba yaraatee shirgudoonkii kale aanay la yeelan qodobkan dastsuuriga ahina uu cadaynayo in talada la wada leeyahay.

Waxaa kale oo qodobkani cadaynayaa qodobka 66aad farqadiisa 2aad *"Xoghayaha Guud waa masuulka ugu sareeya shaqaalaha Golaha kana kaaliya Gudoomiyaha hawlaha maamulka, maaliyadda, shirarka iyo shaqaalaha ee Golaha"* waxay ahayd kana kaaliya shirgudoonka hawlaha maamulka maaliyada shirarka iyo shaqaalaha ee golaha waayo waa qodob dastuuri ah oo aad moodo in inta intii kale laga reebay gudoomiyaha uun lagu soocay.

Qodobka 9aad ee Dastuurka wuxuu odhanayaa nidaamka siyaasideed dawlada waxaa saldhig u ah nabadgalo wadaag, dimiquraadiyad iyo hanaanka xisbiyada, Xeer hoosaadkan cusub ee la ansixiyay 19/02/2014 maaha mid talo wadaaga ee waa mid awoodii dhinac ku ururiyayinaya siinayana awood fara badan gudoomiyaha golaha oo kaliya, goluhuna waa gole lasoo doortay waa gole umada u adeegaya waa gole la rabo inuu talo wadaag noqdo waa gole la doonayo inuu Dastuurka ku dhaqmo. Waxyaabaha aad iyo aadka u cajaaibka ah waxaa ka mida oo goleheena ka dhacda xeer-hoosaadkanina waa mid aynu doonayno mid aynu ku kala hagano inagu dhexdeenu si hanaanka iyo xilkii la inoo dhiibay u guduno si sharciga waafaqsan, waxaa dhacda xubnahya gudiyada oo fara badan sida xeer hoosaadkii hore cadaynayay shirgudoonkaa ka wada tashan jiray xubnaha waa la isku miisaami jiray waa lasoo qori jiray.

Xeer-hoosaadkan dambe wuxuu cadaynayaa in dhamaan xubnaha uu iska qori karo gudoomiyhu isla markaana xubinta uu dantiisa ka arki waayo ama aan xisbigiisa ahayna habeen uu guuraysiin karo oo uu ka eryi karo gudidii sidii ku dhacday xubno badan oo xubnaha golaha ka mida.

Waxaa kale oo uu xeer-hoosaadkani leeyahay khaladaad badan qodobkiisa 11aad farqada 3aad waxay ka hor imanaysaa go'aankii golaha guurtida ee la inagu heshiisiiyay farqadaasi waxay odhanaysaa "*Xeer kasta oo uu Goluhu ansixiyey una gudbaya Madaxweynaha waxaa hubinaaya Guddida Hawlaha Golaha iyo lataliyaha sharciga waxaana wada saxeexaya Gudoomiyaha iyo Xoghayaha*" waxay ahayd oo xeerkii la inagu dhexdhexaadiyayna sheegayaa sharciyana sax ah in shirgudoonku wada hubiyaan gudoomiyaha iyo xoghayuhuna wada saxeexaan si aanay u dhicin muramo badan oo golahana ka dhacday oo markaa in gaari gudbisay ama gudoomiyahoo kaliyi gudbiyay hadhowto khalado ka soo baxeen, iyadoo waxaasoo dhan laga duulayo Dastuurkana qodobo badan oo ka hor imanaa halkan aan ku cadeeyey

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

1. In la laalo xeer hoosaadkii dambe ee goluhu ansixiyay 19/02/2014.

2. In la ansixiyo xeer hoosaadkii hore ee golaha oo lagu daray heshiiskii golaha guurtida.

3. In la isku shaandheeyo Gudiyada golaha isla markaana ay wada jir u magacabaan shirgudoonka oo iyada sideedaba wakhtigii sanadka ahaa ee labada xeer-hoosaadba cadaynayeen ay dhamaatay in la isku shaandheeyo gudiyada golaha wadajirna ay u magacaabaan shirgudoonka golaha.

**Md. Cali Maxamed Aadan "Cali Bare"** Bacda salaam, Arintan laga doodayo ee xeer-hoosaadka golaha horta ugu horeyn waxaan aamin sanahay xeer-hoosaadkii kan la hadal hayo ee la leeyahay golahaa ansixiyay 2014 in aanu xeer-hoosaad ansaxsan ahayn baan aamin sanahay sharciyan, ansaxa goluhuna wuxuu ku xidhan yahay wixii Dastuurka waafaqsan, dastuurkuna wuu ka soo horjeedaa.Sidaa darteed maaha wax xeer-hoosaad lagu tilmaami karo oo waa xeer-hoosaad goluhu leeyahay in lagu dhaqmaana waa xaaraan taas waa qodob.

Soo jeedintii guddida joogtada ee halkan ku qoran iyadana waxaan ka qabaa wax waafaqsan sharciga iyo Dastuurka kuma jiro cid xeer iyo sharci taqaanaana sooma samayn ee waxaa weeye iska macmalaad isaguna Dastuurka ma waafaqsana waxaabad moodaa goluhu indhowayd inuu ku socday indho la'aan jujuub, isjiidhsiin, sharci daro, iyo dastuur jabin dabadeedna goluhu wuxuu ku dambayn doonaa ceeb haduu sidan kusii socdo.

Sidaa darteed xeer-hoosaad Dastuurka waafaqsan ma jiro aan ahayn kii 2005-kii la ansixiyay sidaa darteed.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Inaan loogu dhawaaqin oo loogu dhaqmin oo lagu soo qaadin xeer-hoosaad ansaxsan kaas in dabaysha la raacsiiyo.

- In lagu noqdo xeer-hoosaadkii 2005-kii goluhu ansixiyay oo lagu daray go'aankii golaha guurtidu inagu dhexdhexdaadiyay.waad mahadsantihiin

**Md. Siciid Cilmi Rooble: -** Xeer-hoosaadka la ansixiyay 19/02/2014 cida hogaaminaysay ee nagu waday ee aanu u daba fadhinay wuxuu ahaa Ibraahim ruush, waxyaalaha golahan haysataana waxaa weeye marka awooda iyo karaamada ilaahay inagama qaadine inagu yaynaan iska qaadin xeerkaa hadaynaan waalaynayn waxaynu ku ansixinay 58 xildhibaan. Horta xeer-hoosaadkaas waa ansaxsan yahay hal faqrad baan arkayoo aan ibraahim ku taageerayaa, qodobkaa xil ka qaadista halkuu xeer-hoosaadkan ka qoray absolute majority dastuurku wuxuu tilmaamayaa 2/3, taasi waa sax,

Waa ansaxsan yahay walibana waa mid tafaasiilaysan, waxbaana ka dhiman qodob baan idiin sheegayaa, waa dhawayto waxaanu galnay workshop ambasador buu ahaa gudoomiyaasha gudiyadaa loo yeedhay, nasiib daro ayaamahaa aadbay u maqnaayeen, aniga iyo laba saddex gudoomiye iyo xoghayaha guud iyo xoghaymo ayaanu ahayn, horta waxaa kaliya ee golahani awood u leeyahay ee aan madaxweynana la saxeexin waa xeer-hoosaadka iyo Dastuurka labada gole ayaa xaq u leh Dastuurka madaxweynuhuna ma saxeexo, xeer-hoosaadkeenana maaha macnihiisu inaynu waxa golaha gudeheena ah iyo anshaxa maaha wuu ka sareeya, wax alaale wixii Dastuurka qabyo ah ee ka dhiman waynu ku dari karnaa siduu tilmaamayo dastuurku taa aynu ogaano.

Xeer-hoosaadku wax yaroo fudud oo inaga xaadiriskeena eegaaya maaha, waxyaalo badan oo aanu kii hore ku qornaynina kan imika la ansixiyay waa ku jiraan. Anigu waxaan kusoo darayaa.

Dastuurka qodobkiisa 39 wuxuu sheegayaa tilmaanta guud ee golaha, golaha wakiiladu waa xubno ka wakiila dadweynaha, waana qaybta koowaad ee xeer dajinta, ogolaanshaha iyo ilaalinta siyaasada guud ee dalka, horta siyaasada gabigeeda guud iyo hogaaminta dalka inagaa horta ogolaanayna, miyaa layna soo hor dhigay sow la iskama wato, anigu waxaan odhan karaa goluhu wuxuu ugu yeedhayaa madaxweynaha xeer hoosaadkaynu ku darsanaynaa si uu wax uga waydiiyo hogaaminta dalka, ileyn anaa xaq u leh inaan ilaaliyo ogolaada hogaaminta dalka iyo siyaasada uu ku socdo madaxweynuhu laynama horkeenin.

Barnaamijka xukuumadana laynama horkeenin oo isaguna dastuuriga ahaa ee aynu ansixinaynay, halkaa waxaa weeye awoodeheena wixii inga dhiman ee aanu distoorku ina siin xeer-hoosaadkeena gashaynayaa. Waxaad inoogu

daraysaan in goluhu u yeedhan karo madaxweynaha looguna waydiin karo hogaaminta dalka.

Qodobka labaadna waxaa weeye goluhu wuxuu soo saari karaa go'aamo iyo qaraaro, xukuumaduna waxaa waajib ku ah inay fuliso mana soo calin karto, waxaan kaloon ku darayaa goluhu wuxuu saari karaa gudiyo xaqiiqo raadin ku sameeya arinkasta oo loo baahdo inuu goluhu xaqiiqo dhaba ka ogaado, kadibna wuxuu kusoo saari karaa go'aan ama qaraar, gudoomiyaha ayaana magacaabaya gudiyadaa gaarka ah.

Waxaan kaloon idiin tilmaamayaa xeer hoosaadkanu inuu ka weyn yahay xeer anshax marineed oo aynu awood u leenahay oo wax alaala wixii Dastuurka ka dhiman ku hagaajin karno kuna toosin karno.

**Md. Cabdiraxman Yusuf Cartan:-** shirgudoonka iyo mudanayaasha sharafta leh waan idin salamayaa, horta waxaad moodaa xeer-hoosaadka in woxogaa waxyaabo qormay markii uu jiray muranku ayaa qormay oo u baahan in la soxo oo ay ka mid tahay ta xildhibaanadu ay  sheegeen ee ah tirade 2/3 ka ah ayaa ka mid ah.

Hadii aan u gudbo xeerka, halka hore waxaa ku qoran Gudoomiye Gudoomiye ku xigeen markaa waa in la dhamays tiara oo layidhaa gudoomiyaha Golaha wakiilada.

Waxaan u gudbayaa **Qodobka 3aad** Awoodaha Golaha Wakiiladda waxaa inoogu qoran waxaa muhiim ah in laga dhawaajiyo qodobka dastuuriga ah oo uu halkan ku soo boxo in Golaha wakiiladdu uu yahay wakiilka bulshada Somaliland oo ku hadli kara afka shacabka bulshada Somaliland ku hadli kara kana talin kara aayaha mustaqbalka waxaana hay'adda awoodaa leh.

**Qodobka 7aad Qaab dhismeedka Maamul ee Golaha** inaga waxaa inoo dhaqan ahayd in aan nidhaa shirgudoonbaa hagaya_Golaha Wakiiladda dabadeedna la sheego shirgudoonku waxa uu yahay iyo inta uu ka kooban yahay. Sidaa awgeed xeerkani wuu ka tagay eraygii shirgudoonku waayo xeerku shirgudoonba muu soo hadal qaadin markaa waxaa uu ubaahanyahay in la hagaajiyo.

Waxaa kale oo aan soo qaadanayaa qodobada ka hadlaya shaqo ka erida iyo shaqo ka joojinta Xoghayaha Golaha wakiilada, waxana inoogu qoran in gudoomiyuhu magacaabi karo shaqadana ka eryi karo, aniga waxay ila tahay in ay tahay darajo weyn, markaa waxaa meeshataala laba fikradood oo kala ah gudoomiyuhu marka uu la tashado shir gudoonka waa in uu magacaabaa waana in Golaha laga ansixiyaa xoghayaha erigiisana sidoo kale waa in laga ansixyaa Golaha ayaan soo jeedin lahaa.

Qodobada kale ee u qoran xoghayaha guud waxaan ku dari lahaa madaama uu yahay xoghayaha guud maamulaha admintarationka waa in aanu ku milmin sadexda xisbi ee uu goluhu ka kooban yahay, waana uu dhexdhexaad u yahay sadexdaa waayo hadii kale noqon maayo xoghaye guud hadii la kala socdo xisbiyadaas.

Waxaa kale oo aan ka hadlayaa saacadaha shaqada uu goluhu shaqaynayo waana in goluhu ku shaqeeyaa qaanuunka qaranka waxaan inoo qoron 8:00Am ilaa 12:00pm waxay khilaafsan tahay oo waa afar saacadood oo kaliya. Waxa kale oo jira Qodobkaa 16aad f/11aad waxaa ku qoran Haddii maqnaashaha mudanuhu ka badnaado mudada kor ku xusan waxaa loo gudbinayaa warbixintiisa/teeda Gudoomiyaha Golaha si loo hordhigo Guddida Joogtada ah ee Golaha. Anigu waxaan soo jeedin lahaa si cid walbaaba u ogaato in boodh lagu soo dhajiyo si ay mudanayaashu u ogadan in xeerkaasi uu shaqaynayo.

Waxa kale oo aan intaa ku darayaa in khudbad sanadeed ka marka uu madaxweynuhu uu ka horjeediyo Golaha inta badan wuu iska baxaa, markaa waxaan soo jeedinayaa in su'aalo laweydiiyo ayaan soo jeedin lahaa.
Gudiyada shaqooyinkoodu sifiican uma qorna, waxaa kale oo aan si wanaasan u qornayn qaabka aan miisaniyadeena u maamulayno waana I ay xeer hoosadka ku qornaadaan ayaan soo jedinlahaa waad mahadsantihiin intaa ayaan ku soo koobayaa.

**Md:- Faarax Maxamed Cabdile:-** shir-gudoon iyo mudanayaal waad salaamantihiin, xeerkani waa xeerkii aan ku dhaqmi lahayn mudanayaal, mana aha inaga oo kii hore sidii aan ka yeelnay ee aan ku ansixinay la ogaa. In maant caadifad lagu galo anigu waan ka soo horjeedaa waxaanan odhan lahaa in xeerkan si miyir qabta oo caafimaad qabta aan uga shaqayno oo wixii Dastuurka ka soo horjeeda aan ka saarno wixii sax ah ee macquul ahna waa in aan galinaa sidoo kale waan in aan wixii sharciga ka hor imanaya waa in aan ka saarnaa.

Gudidda joogtadu waxay inoo soo gudbiyeen lifaaqii waxyaabo sharciga ka soo horjeedaa way ku jiraan sidaa darteed anigu waxaan ka saaray qodobka odhanaya in aan la soo hor dhigi karin mooshin ku saabsan gudoomiyaha iyo ku xigeenadiisa in aan la soo hordhigi karin inta mudada Golaha ka hadhay waayo waxay ka soo horjeedaa xaqdastuuriya oo uu Golaha wakiiladu leeyahay waayo qofka waa la dooran karaa waana la qaadi karaa Xilka.

Waayo shalay ayay ahad markii aan diidaynay kootada sidaa awgeed kursiguna maaha in uu noqdo kooto taa anigu waaan ka soo horjeedaa waana inlaga saaraa qodobkaa meesha inaga oo ixtiraamayna gudoomiyaha iyo ku xigeenadiisa isaga oo aan mooshin meesha ool maanta hadana maanta isku xidhimayno kooto maanta ee halaga saaro meesha.

Waxaa kale oo aan ka saaray anshax marinta mudanayaasha waayo rag waayeela ayaa la yahay oo la soo doortay mana aha waxan anshaxmarinta ah ee alkan ku yaalaa waayo qaarkood way ka soo horjeedaan Dastuurka oo sida loo anshax marinayaa waxay ku taalaa Dastuurka, anshaxmarintaa anigu waxaan ku soo koobi lahaa in mudanaha in marka hore loo qoro qoraal digniin ah loona tiriyo 20-kii fadhi iyo 56-kii isku celceliska ahaa dabadeedna kii buuxiya laga saaro Golaha.

Waxaa kale oo aan wax ka qabaa saacadaha shaqada waayo waxaa wax ku qoran in la shaqaynayo 8:30Am ilaa 2:00pm wax inaga suuro galaya maahan ee wax aan inoo soconayn yaynaan meesha ku qoranin waxaan qabaa in lagu qoro 8:00Am ilaa 12:00pm oo aynu inta badan shaqayno.

Anigu ma qabo in la laalo xeerkan waayo kan danbe ayaynu akhrinay ninkii wax kabadalaya ama qaladaad ku arkay waayo dastuurku waxaa uu odhanayaa waxaa dalka ugu sareeya waa Dastuurka, wixii xeerkan ah ee dasruurka ka hor imanaya waa waxba kama jiraan.
Sidaa daraadeed xeerkii hore waxaan u tuurnay siyar oo fudud oo caadifad ah hadii aan maanta kana si yar oo caadifad ah u tuurno waxba hagaajin mayno waxaan qabaa in wixii sharciga ka soo horjeeda waa in laga saaraa wixii laga maarmaan aan u aragno waa in aan kan ku darnaa oo aan ku hagaajino.

**Qodobka 5aad** waxaan ku daray farqad 6aad oo odhanaysa hadii uu wakhtigu dheeraado waxaa uu qaadan karaa 30-daqiiqo oo shaah ah waa maalinta ugu horaysa ee la dooranayo shirgudoonka iyo ku xigeenadiisa.

**Qodobka 6aad F/11aad** ee odhanaysa Gudoomiyuhu inta aanu wax shaqo ah bilaabin wuxu u dhaaranayaa ~~qaranka~~ Golaha isagoo raacaaya ~~**Qodobka 129aad** ee Dastuurka Qaranka~~ waxaanan ku badali lahaa halkaa inta aanu shaqada bilaabin waxaa uu u dhaaranayaa Golaha waayo hore ayuu u soo dhaartay oo mudanayaasha la dhaarinayo ayuu ka mid ahaa, waayo daartaa qaranka ayuu u dhaartay tan labaadna waxaa uu u dhaaranayaa Golaha.

Waxaa kale oo aan ku sii daray farqad 17aad, waxaana dhaarinaya gudoomiyaha xubinta ugu da'da weyn marka uu doorashada ku guulaysto. Waxaa kale oo aan ku daray 18aad labada ku xigeen waxaa dhaarinaya gudoomiyaha Golaha.

**Qodobka7aad farqadiisa 3aad** ee sheegaysa cida soo magacaabaysa xoghayaha iyo ku xiheenkiisa waxaa soo magacaabaya gudoomiyaha waxaanan ku daray waxaa ansixinaya Golaha. Farqada 4aad gudoomiyaha ayaa shaqo jeejin ku samaynaya xilkana ka qaadi kara xoghaya guud iyo ku xigeenkiisa waxaan ku daray waxaana ogolaanaya Golaha.

Isla qodobkaa farqadiisa (c) oo ka halaysa Arrimaha la xidhiidha cabashada shaqaalaha, racfaan IWM waxaa loo gudbinayaan guddida joogtada ah oo awood u leh dib-u-eegista cabashada shaqaalaha. Waan ku sii daray *waxaa Gudidda joogtada ah ku waajiba inay in gudoomiyaha u gudbiyaan cabashada soo baxday.* Isla qodobkan xarafkiisa (e) Xoghaynta waxa waajib ku ah in xubin ama xubno ka tirsani ay ka qayb galaan shirkasta oo u qabsoma Golaha Wakiilada, si ay u diiwaangeliyaan doodaha, isweydiinaha, go'aamada Goluhu gaadho, iyo hadal qoraalka (Minutes). Waxa aan ku sii daray *marka aanu gudoomiyuhu ama aqlabiyada goluhu aanay si kale u codsan.*

Halkaa waxaan ku sii daray farqad (g) oo odhanaysa *xubin kasta oo ku shaqo leh xoghayn ama masuuliya Golaha Wakiiladda ah waxaa dhaarinaya xoghayaha guud ee Golaha wakiilada isaga oo ku dhaarinaya in daacad u yihiin hawlaha Golaha oo ay xafidayaan qoraalada Golaha.*

**Qodobka 10aad** ee ka hadlaysa xil-waayida gudoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa farqada 1aad xarafka (b) Istiqaalo qoraal ah oo uu u soo gudbiyo Golaha waxaan ku daray *goluhuna ka aqbalo aqlabiyad fudud* isla qodobkaa xarafkiisa (~~I) Xukun kama dambays ah ay ku riday maxkamad awood u leh oo uu ku mutaysanaayo xabsi aan ka yarayn lix billood(6)~~ *qodobkaasi dastuurka ayuu ka soo hor jeedaa ee waa in laga saaraa meesha* waayo sida sharciga waa in lagu helaa danbi ciqaantiisu tahay 3sanadood.

**Qodobka 14aad farqada 9aad** oo odhanaysa Wixii la xidhiidha fasaxa dhalmada iyo mudadiisa waxaa~~faah faahinaya shuruucda dalka~~. Waxaan ku badalay *waxaa go'aan ka gaadhaya gudoomiyaha Golaha.*

**Qodobka 15aad farqadiisa 6aad** ee odhanaysa ~~Golaha Wakiiladu waxa uu curin doonaa xeer jideynaya in mudanayaasha xeerdejinta gadiidkooda la siiyo sumad (lambar) u gaar ah.~~ Halaha saaro ayaan odhan lahaa.

**Qodobka 16aad farqadiisa~~13aad ee odhanaysa Kalfadhi kasta waxa gaarkiisa la isugu geynayaa maqnaashaha mudanaha waxaana guddida joogtada ahi ku soo saareysaa qoraal~~.** Waxaan soo jeedinayaa in laga saaro
**Qodobka 16aad farqadiisa ~~16aad ee odhanaysa Mudanuhu fadhiga kama bixi karo ilaa Gudoomiyhu uu xidho fadhiga socda.~~** Waxaan soo jeedinayaa in laga saaro

**Qodobka 20aad farqadiisa 6aad** ee odhanaysa Marka doodu dhamaato, haddii ugu yaraan ay kala badh iyo hal tirada guud ee Golaha u codeeyaan mooshinka madaxweynaha xilka lagaga qaadayo waxa go'aankan Golaha loo gudbinayaa Golaha Guurtida. Waxaan ku daray *marka laga reebo kuraasta maqnaashohooda la shaaciyay.*

**Qodobka 56aad** ee sheegaya ~~Guddida Hawlaha Goluhu waxay ka koobnaan doontaa:Gudoomiyaha Golaha WakiiladLabada Gudoomiye~~ Waxaan leeyahay hawlahooda ayaaba ka badan waxaan qabaa in gudidaa meesha laga saaro Ajandahana waa in siidii hore ee loo soo samayn jiray waa in loo soo sameeyaa maadaama oo uu golugu ansixinayo

**Qodobka 62aad** halka ay ku qoran tahay Xulista xubnaha guddida cadaaladda ka galaya Golaha Wakiilada waxaan ku daray *waxaa ogolaanaya Golaha.*

**Qodobka 67aad ee sheegaysa wax-kabadelka xeer-hoosaadka Golaha wakiilada** Waxka bedelka Xeer hoosaadka waxaa soo jeedin kara:-

a) Guddida Joogtada ah ee Golaha Wakiilada *waxaan ku daray farqad*
*b) Waxaa kale oo soo jeedin kara 2/3 27 xubnood ee Golaha.*

**Qodobka 72aad** Talaabooyinka ku saabsan kala dirista Golaha, wuxuu Goluhu u igmanayaa oo wakiil uga noqonaya Guddida garsoorka, cadaaladda iyo xuquuqul insaanka iyo la taliyaha sharciga ee Golaha Wakiilada *waxaan ku sii daray sida uu dastuurku cadaynayo.*

**Qodobka 73aad farqadiisa 2aad** Xeer-hoosaadku wuxuu dhaqangalayaa marka Golaha wakiiladu ansixiyo~~Gudoomiyuhuna saxeexo~~. Waxaan soo jeedinayaa in uu ansaxo marka goluhu u codeeyo.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf: -** shirgudoonaka iyo xildhibaanadaba waan salaamayaa, waxaan u haystaa xeer-hoosaadkii aan 2014-kii ansxinay oo lagu darayo heshiiskii Golaha Guurtida wixii ay danmoodeen in lagu soo kordhiyo xeer-hoosaadka iyo qodobo kale oo xaadirista iyo anshaxmarinta ah inahaas ayaan moodayay in aan maanta ka doodaynay.

Lakiin xeer-hoosaad dhamaaday oo la ansixiyay hadii ay timaado qodobo Dastuurka ka soo hor jeeda oo ay ku dareen waa laga badelayaa xubnaha golaha ee soo jeediyayna way ku mahadsanyihiin.

Anigu waxaan taageer sanahay xeer-hoosaadkaa ansaxay ayaan taageerayaa oo aad iyo aad loo soo kala hufay loona soo kala haadshay oo ragbadani ay ka qayb galeen kaas ayaab taageerayaa.

Waxaan ka hadlayaa go’aanka ay guurtidu keentay ma kamid noqon karaa xeer-hoosaadka goalaha mise ka mid noqon karo? Guurtidu waa gole inoo soo gurmaday oo khilaafaadkeenii jaray oo dabadeed go’aan keenay oo ah in aan la ridi Karin shirgudoonaka inta wakhtigoodu dhamaanayo ah oo aan ahyn mid waligiiba jiraya ayaan qabaa anigu.

Anigu waxaan taageerayaa wax allaale wixii wanaagsanaa ee la soo jeediyay waxaan ka soo horjeedaa wixii Dastuurka ka soo horjeeda waxaanan leeyahay halaga saaro, waxaa kale oo aan leeyahay kii hore lagu daro wixii wanaagsan isaga oo aan wax la yeelin.

Arinta xaadiriska waa dhibka aan leenahay ee hadii la keenayo allaado ama saacad qorta habsanka oo la ururiyo lagana jaro xildhibaanka mushaharkiisa waan soo jeedinayaa.

**Waxaan soo jinayaa:-**

- Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa Golaha guurtidu go'aankii ay gaadhay in aanu ka mid noqon xeer-hoosaadkaa lagu dhaqmayo.

- Dhanka saacadaha shaqada waxaan soo jeedinayaa inlaga dhigo 8:30Am ilaa 11:30Am ayaan soo jeedin lahaa.

- Waxaan ugu danbayntii soo jeedinayaa in xeerkan uu yahay xeer wanaagsan oo aan sidiisa ugu dhaqano wixii Dastuurka ka horimanaya laga saaro waad mahadsantihiin.

**Md. Saleebaan Cawad Cali (bukhaari)** sida aan wada ogsoonahay waxaa socotay doodii xeer-hoosaadka Golaha wakiiladda, xeer hoosaadkii ugu horeeyayna waxaa la sameeyay 2005-kii markii goluhu uu bilaabmayay, xeerhoosaadkaasi waxaa uu haa xeer-hoosaad loo sameeyay goluhu markii uu bilaabmay, waxaan markaa odhanayaa xeer-hoosaadkii la sameeyay 2014 waxaa uu ahaa xeer-hoosaad Golaha ku yimid si kadis ah awoodo badana la siiyay gudiyada , xildhibaanadana waxyaabo badan oo aan ku gaboonayn la siiyay sida anshaxa oo sheegaya in boodh lagu soo dhajiyo iyo in mushahar laga jaro sheegaya.

Wuxuu ahaa kii abuuray mixnadii ugu balaadhnay ee Golaha soo martay, wuxuu ahaa kii markuu lixbilood socday garnaqsigiisu Guurtida gaadhay, wuxuu ahaa xeer-hoosaad ku salaysan caadifad, wuxuu ahaa xeer-hoosaad ku salaysan siyaasad. Maadaama uu sidaa ahaa oo Golaha waxaa uu soo mariyay la ogaa hadana laga bogsaday.

**Doodayda oo urursan ama soo jeedintaydu tahaydu waxay tahay:-**

- In la ansixiyo lana dhaqan galiyo xeer-hoosaadkii 2005-kii oo lagu daray heshiiskii guurtidu soo jeedisay.

- Si xaaladeenu u daganaato, wasiirada, xildhibaana marka ay galayaan madaxtooyada staff-koodu waxay ku hadhaan dibada waxaan soo jeedinayaa staff-ka xildhibaanada, gudoomiyaha, Gudoomiye xigeenada inay dibada joogaan oo aanay gudaha soo

galin oo ay dibada ku sugaan shaqaalaha gaarka ah ee Golaha mooyaane.

- Mar hadii xeer-hoosaadkani uu khilaafsanyahay Dastuurka waa in la laalaa meeshana laga saaraa.

**Md. Cabdiraxmaan Maxamed Jaamac (Awxoog)** shirgudoonka iyo xildhibaanadaba waan salamaayaa, maanta oo ay taariikhdu tahay 8-sep-2015 doodayda waxaan ku salaynayaa sadex document oo kala ah xeer-hoosaadkii goluhu ansixiyay kuna ansixiyay codka aqlabiyada ah taariikhdu markay ahayd 19-02-2015, go'aankii Golaha guurtidda ee soo afjaray khilaafkii Golaha Wakiiladda ee ku taariikhaysnaa 18-02-2014 iyo qodobadii ay Gudidda Joogtada ah ay ku soo kordhisay xeer-hoosaadka ee ku xusan warbixinta Gudidda joogtada ah kuna taariikhaysan 25-08-2015 waxaan u arkaa in ay tahay biyo kama dhibcaan ah Gudidda joogtada ahi ay is waafajiso go'aankii Guurtida iyo xeer-hoosaadkii goluhu ansixiyeen.

Xeer-hoosaadkii goluhu ansixiyeen waa mid ansaxa oo shaqaynaya, waxaanan u arkaa inuu yahay 99% inuu saxyahay dastuurkana waafaqsanyahay garana maayo sabab looga doodo.

Sida ay xildhibaano badani soo jeediyeen in la saxo khaladaadka madbiciga ah ee ku jira xeer-hoosaadka waan ku taageersanahay qodobkaa lakiin wax kale oo laga saaro ma taageersani.

Xeer-hoosaadku waa xeer aad looga soo shaqeeyay oo rag aqoon badani lihi u sameeyaan, waana mid goluhu uu ku ansixiyay aqlabiyad markaa waxaan leeyahay in aan dib loo celin xeer-hoosaadkaa goluhu uu ku anxiyay 53-ka mudane oo gacan taag ah.

Waxaa kale oo aan leeyay dadka qaar ayaa waxay ka hadleen awoodaha gudoomiyaha waxaanan leeyahay xeer-hoosaadadii ina soo maray si isku mid ah ayay ugu yaaleen awooduhu, waxaanay la mid tahay wadankeena Somaliland Madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen ayuu leeyahay habka loo raacay ayaa loo raacayaa oo Gudoomiye ku xigeenku waxaa uu sii gudoomiyaa inta uu gudoomiyuhu maqan yahay ayuu sii gudoomiyaa shirka.

Gudoomiyuhu waxaa uu matalaa kuna hadlaa afka Golaha wakiilda, waxaa kale oo uu magacaabaa xoghaya guud ee Golaha iyo ku xigeenkiisa, waxaanu ku samayn karaa shaqo ka joojin sida uu dhigayo xeer–hoosaadkasta oo aan soo marnay,Waxaa kale oo jira hal-gudoomiye iyo laba Gudoomiye ku xigeen.

Waxaa kale oo xildhibaanadu ka hadleen isku shaandhayntii lagu sameeyay gudiyada Golaha waxaan leeyahay wali lama gaadhin laba sano, wax la isku

badali karaana ma jiraan waana awood u gaaran in uu cid gudi ka badalo oo uu mid kale u badalo.

Hadii aan u daadago warbixtii ay soo saareen gudida joogtada ah warbixintaa oo is waafajinaysa go'aankii Golaha guurtidda iyo xeer-hoosaadka ee khilaadkii Golaha Wakiiladda iyo qodobo ay ku soo dareen gudidu ayna u arkeen in ay tahay lagama maarmaan.

Marka aan warbixintaa eego ee aan gudaha u galo dimaquraadiyadaa ku jirtee, waxay soo qoreen qodobka 10aad farqadiisa 2aad ee xeer-hoosaadka oo odhanaysa Moshinka xil ka qaadista Gudoomiyaha kuna salaysan asbaabaha ku xusan farqadda 1aad, xarfaheeda c, d, f, waxaa keeni Kara xildhibaano aan tiradoodu ka yarayn saddex meelood meel (1/3) tirade guud ee Golaha. Codka xil ka qaadista wuxuu ku ansaxayaa aqlibiyada saddex meelood laba meel (2/3) ee xubnaha guud ee marka laga reebo xubnaha banaanaanshahooda la baahiyay. Anigu waxaan soo jeedinayaa in gudidu sidii uu ahaa loo daayo waayo waa xeer-hoosaad ansaxa oo 50 xildhibaan lagu ansixiyay.

Waxaa kale oo uu go'aanka Guurtidu soo kordhiyay in la waafajiyo xeer-hoosaadka Golaha Wakiiladdu ay ka mid yihiin arimahan:-

- In shirgudoonka aan mooshin laga keeni karin ilaa inta ay mudadoodu dhamaanayso hadii aanay xilkooda u gudan waayin si waafaqsan xeer-hoosaadka iyo Dastuurka qodobkaa waxaa inagu dhexdhexaadiyay Golaha Guurtida sida ay gudidu u soo dhigeen sidiisa loogu daro.
- Qodobka 32aad nidaamka ay u fahdiisanayaan lanada Gudoomiye waxaan soo jeedinayaa sida ay u dhiyaan loodaayo sida ay guurtidu soo jeedisay.

Waxaan galayaa qodobkii ay gudiddu ku soo kordhisay oo ahaa saacadaha shaqadu waa 8:00Am ilaa 2:30Pm hadii aanay jirin meel wax laga cunaan xildhibaanadu 2:30-ku suuro galmaaha ayaan leeyahay hadii aan la samaynay marka salaada la tukado inta la baxo aan la soo noqonayn oo halkaa aan laga dhamaystirin saacadaha shaqada.

Halka ay faahfaahin ay ka yidhaahdeen saaxada sexeexa oo ah 8:00 Am ilaa 8:45AM waxaan leeyahay halkaa halaga dhigo ilaa 900Am in uu xildhibaanku yimaado oo uu saxeexo waraaqda. Faahfaahintaa badana halaga saaro ayaan odhan lahaa.

Waxaan raacsanahay hadii xildhibaanku inta uu yimaado oo uu saxeexo iska boxo waxaa uu la xukun noqonayaa mid maqan aad ayaan u taageersanahay, waxaa kale oo aan taageerayaa in xildhibaanka ka maqnaada fadhiga 3 cisho

oo is xiga halkaa waxaan ku badali lahaa 7cisho oo is xiga ayaa la siinayaa digniin afka ah.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in laga saaro meesha ay ku qorantahay halaga jaro xildhibaanada xildhibaan ogol ma jiro in lacag laga jaraa ma jiro ee waa in laga saaraa meesha. Waxaa kale oo aan taageerayaa in sidii uu sheegayay Dastuurku sheegayay in xildhibaanka 20 kalfadhi ka maqnaada la eryo.

**Soojeedin:-**

- Waxaan soo jeedinayaa in go'aankii Guurtida lagu daro lagu daro xeer hoosaadka.

- Xeer-hoosaadkaa ansaxsan ayaynu haysanaaye waa in kaa lagu kordhiyaa wixii ay soo jeedisay gudida joogtadu

**Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nac-Nac):-** shirgudoonka sharafta leh iyo xildhibaanaduba way salaamanyihiin, waxaan leeyahay xildhibaanadii iga horeeyay ee lahaa halagu dhaqmo xeer hoosaadkii hore ma taageersani kaliya waxaan ka taageersanahay kaliya inta Guurtida mooyaane.

Waxaan leeyahay halagu dhaqmo Xeer-hoosaadkii hore waayo kaas ayaa ahaa xeer-hoosaad kaliya waxaan soo jeedinayaa halagu daro go'aankii Golaha Guurtida waad mahadsantihiin.

**Cawad Cali Maxamed** **C/risaaq Siciid Ayaanle**

**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**

------------------------------------------------- -----------------------------------------